



## Macluumaadka Waalidka ee ku Saabsan Imtixaanka ELPA21

Waalidiinta iyo Mas'uuliinta Qaaliga ah:

Inta u dhaxeeysa Talaado, bisha labaad taariikh 02 iyo Talaado, bisha seddaxaad taariikh 09, Ardaygaaga wuxuu qaadanayaa imtixaanka fasiixnimada luuqada Ingiriiska ee qarniga 21 oo loo yaqaano ELPA21 Summative Assessment.

ELPA21 waa imtixaan koompuyuutarka laga qaato oo lagu ogaanaayo horumarka uu ka sameeyay ardayga barashada luuqada ingiriiska inta aay ku sii socdaan dhameeystirka waxbarashada k-12 ilaa heer jaamacadeed

ELPA21 waxaa looga tiragalay in lagu soo aruuriyo macluummadka ku saabsan horumarka aay ardayda ka sameeynayaan haleelitaanka fasiixnimada luuqada ingiriiska ee (ELP) nidaamkani wuxuu cadeeynayaa, oo uu bayaaninayaa sida ugu fiican oo luuqada ingiriiska lagu fahmo iyo xirfadaha kala duwan ee la isticmaalo ayada oo la eegayo dhamaan .

Macluumaadka laga helay natiijada imtixaanka ELPA21 waxaay ku caawineeysa macalimiinta in aay si fudud u ogaadaan awooda ardayga iyo meelaha loo baahanyahay in xoogaa xooga la saaro.

Warbixinta ka soo baxday imtixaanka waxaay ku caawineeysaa macalimiinta in aay qaataan go'aan wanaagsan iyo in aay sarra u qaadaan qaabka aay wax u barayeen..

Dhamaan ardayda ELL ka waxaa laga doonayaa in aay qaataan imtixaanka ELPA21 sanad walba xitaa haddi uu waalidkood ka saaro caawinta adeega ELLka . natiijada imtixaanka waxaay ka caawineeysa ardayga tilaabada xigta ee waxbarashadooda.

Haddii aad qabtid wax suaal ah oo la xariira imtixaanka ELPA21 fadlan la xariir macalimka ELL Ka Mahadsanid,

Macalimka ELL



### Faaidada ELPA21

- waxaay cabirtaa kobaca luuqada sida dhageeysiga, ku hadalka, akhrinta, iyo qorridda waxaa kaloo lagu ogaadaa meela uu canuga ku liito ama uu ku fiicanyahay
- Waxaay cabirtaa kabaca sanad walba
- waxaay cabirtaa natiijada canuga ayada oo loo bar bar dhigayo ardayda kale ee dugsiya ama wadanka oo idil